Social Security

Waxyaabaha Aad Dooneyso In Aad Ogaato Marka Aad Qaadaneyso Macaashka Hawlgabka Ama Dhaxalka

2013

www.socialsecurity.gov

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Booqo bartayada internetka

Bogga internetka, ***www.socialsecurity.gov***, waa meel aad macluumaad qiime badan leh iyo dhamaan barnaamijyada Lambarka Bulshada. Boggeena internetka, waxa kale oo aad ka heli kartaa:

- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Waxa aad ka eegi kartaa *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambar Bulshada*);
- Waxa aad ka heli kartaa cinwaanka xaafiisyada Lambarka Bulshada;
- Waxa aad ka codsan kartaa kaar bedelka ee Medicare; iyo
- Waxa aad ka heli kartaa nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno.

Adeegyada aan bixino waxa ay inta badan ku kooban yihiin afka Ingiriisiga

Waxa aad soo wici kartaa Lambarkeena lacag la'aanta ah

Bogeena internetka waxaa kuu dheer in aad naga soo wici akrto telefoonka lavag la'aanta ah **1-800-772-1213**. Telefoonada oo dhan waa qarsoodi Haddii aad ku hadasho afka isbaanishka, doorop 2. Luqadaha kale dooro 1, ama khadka ku jir oo iska aamusnoow inta fariinta afka ingiriisga ah ay socoto ilaa qof kula hadlo oo ka jawaabo telefoonka. Wakiilka kula hadla ayaa kugu xiraya turjubaan kaa caawiya telefoonka. Adeegga turjubaanadu waa lacag la'aan. Waxa aan ka jawaab dhamaanbi karnaa su'aalaha aad qabtaan 7 subaxnimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Guud ahaan, muddo gaaban ayaad sugeysaa in laga jawaabo telefoonka haddii aad soo wacdo todobaadka gudihiisa wixii ka dambeeya talaadada. Macluumaadka waxa telefoonka ku heli kartaa 24 saac ee maalin kasta. Haddii aad dhagaha jigto, waxa aad wici kartaa lambarka TTY, **1-800-325-0778**.

Waxaa kale oo aan dooneynaa inaad hesho amcluumaad sax ah iyo adeeg ku raali geliya. Taas weeye sababta telefooada aad soo wacdo loo dhageysto si loo hubiyo in la idiin qabtay adeeg idin raali galiya.

Ki sa ki andedan

Hordhac 4

Macluumaadka Macaashkaaga 4

Adeegga aan bixino 6

Waxyaabaha lagaa doonayo in aad na soo wargeliso 8

Adiga oo shaqeynaya hadana qaadanaya macaash 14

Macluumaad kale oo muhim ah 19

Fariin ku saabsan Medicare 22

Hordhac

Buugan waxa uu faahfaahin ka bixinayaa qaar ka mid ah waxyaabaha aad xuquuqda u leedahay iyo xilka ku saaran marka aad qaadato macaashka hawlgabka iyo dhaxalka.

Waxaanu kugula talineynaa in aad si taxadar leh u akhriso buugan oo aad meel fiican dhigto si aad mustaqbalka ugu noqoto.

Haddii aad sidoo kale qaadato Macaashka kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI), akhri *What You Need To Know When You Get Supplemental Security Income (SSI)* (Publication No. 05-11011).

Macluumaadka Macaashkaaga

Goorma iyo sidee ayaa loo bixinayaa macaashka

Macaashka Lambarka Bulshada waxaa la bixiyaa bisha xigta bisha ay u buuxsanto, tusaale ahaan, bisha Luulyo waxaa lagu sinayaa macaashka Agoosto. Guud ahaan, maalinta bisha ee aad qaadaneyso macaashka waxa ay ku xiran tahay taariikhda dhalashada ee qofka aad dakhligiisa ku qaadaneyso macaashka. Tusaale ahaan, haddii aad ku qaadato macaashka adiga oo hawlgab ah, maalinta aad qaadneyso macaashka waxaa laga ogaanayaa taariikhda dhalashada. Haddii aad macaashka ku qaadato dakhliga xaaska/sayga maalinta aad qaadaneyso macaashka waxaa laga ogaanayaa taariikhda dhalashada xaaska/sayga.

Taariikhda dhalashada	Macaashka la bixinayo bil kasta
1da - 10ka	Arbadaca Labaad
11ka - 20ka	Arbacada Sadexaad
21ka il aa 31ka	Arbacada Afraad

Haddii aad qaadato macaashka Lambarka Bulshada iyo SSI, lacagta macaashka ee Lambarkaaga Bulshada waxa aad heleysaa sadexda bisha iyadoo SSIda aad heleyso kowda bisha.

Lacagta lagu bixiyo habka elektaroonigga ah

Marka aad codsato macaashka Lambarka Bulshada, waxa aad ogolaan kartaa in lacagta laguugu soo diro hab elektaroonig ah.

Habka xisaabta toos loogu shubo waa mid fudud, amaan ah oo ah sida ugu amaansan ee aan kuu siin karno lacagta. La xiriir bankiga aad xisaabta ku leedahay si uu kuu caawiyo. Ama nala soo xiriir si xisaabtaada toos laguugu shubo.

Hab kale oo aad dooran karto waa barnaamijka kaarka Direct Express®. Adiga oo isticmaalaya Direct Express® oo lacagtaada lagu shubayo xisaabta kaarka. Waa mid fudud dhaqsana ah in aad kaarka sameysato. La soo xiriir lambarka lacag la'aanta ah ee qeybta xisaabaadka oo ah **1-800-333-1795**. Ama iska diiwaangeli barta internetka ee ***www.GoDirect.org*** sidoo kale Lambarka Bulshada ayaa kaa caawin kara in aad iska diiwaangeliso.

Doorashada sadexaad waa habka wareejinta ee elektaroonigga ah Habkan qiimaha ee dawladda dhexe damaanad qaaday waa mid kuu ogolaanaya iyada oo amaan ah kuna haboon in lacagta si toos ah laguugu soo diro. Waad nala soo xiriir kartaa ama soo booqan kartaa barta internetka ee ***www.eta-find.gov*** si aad u hesho macluumaad ku saabsan barnaamijka, ama aad u hesho bangi, xisaabta keydka ama bangiyada dadku maamulo ee kuugu dhow si aad xisaab uga furato.

Haddii aadan helin lacagta lagu soo diray taariikhda laguu qabtay, si degdeg ah nagala soo xiriir lambaka lacag la'aanta ah **1-800-772-1213.**

Haddii laguu soo diro lacag aadan xaq u laheyn, bangigaaga haku soo celiyo waaxda xisaabaadka ee dawladda. Haddii aad si bareer u qaadato lacag aadan xaq u laheyn, waxaa suurtogal in maxakamad lagugu saaro.

Canshuur aad ka bixiso macaashka

Qiyaastii 40 boqolkiiba dadka qaata macashka Lambarka Bulshada waxa ay iska bixiyaan canshuurtooda. Waa in aad canshuur ka bixisaa macaashka aad qaadato haddii aad canshuurta keli ahaan u xareyneyso dakhliga ku soo galana ka badan yahay $25,000. Haddii aad canshuurta si wadajir ah u xareysaan, waa in aad canshuurta bixisaa haddii dakhliga labadiina idin soo gala ka

badan yahay $32,000 Haddii aad xaas tahay oo aad canshuurta gooni u xareyso, waxa ay u badan tahay in aad canshuur ka bixineyso macaashkaaga.

Si lagaaga jaro canshuurta, waa in aad buuxisaa foomka W-4V ee Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS)adiga oo kala xiriiraya telefoonka **1-800-829-3676** ama adiga oo soo booqda bogeenna. Ka dib marka aad buuxiso foomka oo aad saxiixdo,boostada ugu soo dir Xafiiska Lambarka Bulshada ama shaqsi ahaan u gee.

Macluumaad dheeraad la xiriir lambarka lacag la'aanta ah ee Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS), **1-800-829-3676**, oo weydiiso daabacaadda 554, *Tax Guide for Seniors*, iyo Publication 915, *Social Security and Equivalent Railroad Retirement Benefits.*

Adeegga aan bixino

Adeegga Lambarka Bulshada ee Lacag La'aanta Ah

Shirkadaha qaarkood ayaa faafiya dacaayad ah in ay kuu bedeli karaan magaca ama kaarka lambarka bulshada lacag la'aan. Adeegaas waxaa lacag la'aan kuugu qabanaya Lambarka Bulshada, lacag ha ku bixin adeeg aad lacag la'aan ku heli karto. Na soo booqo ama soo booqo barta internetka. Xafiisyada Lambarka Bulshada waa goobaha ugu haboon ee laga radiyo macluumaadka ku saabsan Lambarka Bulshada.

Dhameystirka macluumaadka

Markii muddo la joogaba waxaan kuu soo direynaa macluumaad muhim ah oo ku saabsan macaashka Lambarkaaga Bulshada, sida:

- **Isbedelka sicirka nolosha**
  Haddii sicirka noloshu krodhay, bisha si toos ah ayaa macaashka ad qaadato u kordhayaa. Waan kuu sheegeynaa inta uu kordhayo macaashkaaga.
- **Xadka sanadalaha ee dakhliga**
  Haddii aad ka yar tahay da'da hawlgabka buuxa, waxaa jira xad u go'an dakhliga ku soo geli kara welina aad macaashka qaadan karto. Tiradani waa mid isbedesha sanad walba. Waan kuu sheegeynaa inta uu noqnayo macaashkaaga. Macluumaad

dheeraad ah, oo ay ka mid tahay xadka u go'an 2013, ka akhri bogga page 14aad.

Sidee ayaan kuula soo xiriireynaa

Inta badan waxa aan adeegsanaa boostada telefoon laguu soo diro marka aan dooneyno in aan kula soo xiriirno, laakiin mararka qaarkood wakiil ka tirsan Lambarka Bulshada ayaa laga yaabaa inuu yimaado gurigaaga. Wakiilka ka socda xafiiskeena waxa uu ku tusayaa aqoonsigiisa inta aanu kaalla hadlin macaashkaaga. Haddii aad mar uun ka shakiso qof sheeganaya inuu ka socdo Lambarka Bulshada, la soo xiriir Xafiiska Lambarka Bulshada oo weydii haddii uu jiro qof doonaya inuu ku arko. Xusuusnoow, shaqaalaha Lambarka Bulshada marna lacag kuma weydiisanayaan hawsha ay kuu qabanayaan.

Barta internetka *my* Social Security

Waxa aad si fudud uga sameysan kartaa barta internetka oo amaan ah ***my* Social Security**. Waxa aad isticmaali kartaa ***my* Social Security** si aad u akhriusan karto *Social Security Statement* una hubiso dakhliga ku soo gala iyo qiyaasta macashka aad heleyso. Haddii aad iminka macaashq aadato, waxa aad awood u yeeleneysaa:

- Waxaa aad ka heli kartaa warqadda xaqiijinta macaasha;
- Aad bedesho cinwaankaaga iyo tgelefoon lambarkaaga, ama
- Aad bedesho lacagt atoos loogu shubo bankiga.

Waxa aad sameysan kartaa xisaab aad kala socoto ***my* Social Security** haddii da'daadu tahay 18 ama ka weyn, leedahay Lambarka Bulshada iyo iimeyl shaqeynaya iyo cinwaanka boostada. Si aad sameysato xisaabtaas soo booqo ***www.socialsecurity.gov/myaccount.*** Waxaa lagu weydiin doonaa macluumaadkaaaga sahaqsiga ah si laguu aqoonsado ka dibna waxa aad la baxeysaa magac xaraf sir ahna waad sameysaneysaa.

Waxyaabaha lagaa doonayo in aad na soo wargeliso

Xilka ku saaran

Waa muhim aad sida ugu dhaqasaha badan nagu soo gaarsiiso mar haddii mid ka mid isbedelada soo socda ay dhacaan:

FIIRO GAAR AH: *Isbedelka oo aadan soo sheegin waxa ay keeni kartaa in lagu siiyo lacag dheeraad ah. Haddii lagu siiyo lacag dheeraad ah, waanu kaa soo celineynaa lacagta dheeraadka ah oo lagu siiyo. Sidoo kale, haddii aadan soo sheegin isbedelka waqtiga ku haboon ama aad si bareer u smeyso odhaah aan sax aheyn, waxaa suurtogal in lagaa joojiyo macaashka. Marka ugu horeeya ee aad xad gudub noocaas aad sameyso, macashka ayaa lagaa joojinayaa muddo lix bilood; marka labaad, 12 bilood; marka sadexaadna ilaa 24 bilood.*

Waad na soo wici kartaa, noo soo qori kartaa ama soo booqan kartaa si aad noogu sheegto. Marka horey u soo qaado lambarka codsigaaga. Haddii lagu siiyo macaash ku sleysan shaqada, lambarka codsiga waxaa kuu noqnaya Lambarkaaga Bulshada. Haddii aad macash ku qaadaneyso shaqada uu qabtay qof kale, lambarka codsiga waxaa uu ku qoran warqad kasta oo aan kuu soo dirno oo ku saabsan macaashkaaga.

Macluumaadka aad siiso hay'adaha kale ee dawladda waxaa ay u soo gudbinayaan Lambarka Bulshada, laakiin waa in aad sidoo kale noo soo sheegtaa isbedelka.

Haddii uu isbedelo qiyaasta dakhligaaga

Haddii aad shaqeyneyso, waxa aan inta badan ku weydiisanaa in aad qiyaasto inta uu noqonayo dakhligaaga. Haddii mar dambe, inta lagu jiro sanadka aad garawsato, dakhligaaga uu ka yar yahay ama ka hooseeyo sida aad ku qiyaastay, na soo wargeli sida ugu dhaqsaha badan si aan wax uga bedelno macashkaaga. Akhri “Working and getting Social Security at the same time” ee bogga 14aad si ay kaaga caawiso in aad sameyn karto qiyaas sax ah.

Haddii aad guurto

Marka aad qorsheyneyso in aad guurto, noo sheeg cinwaankaaga cusub iyo telefoon lambarkaaga sida ugu dhaqsaha badan marka aad ogaato. Xitaa haddii macaashkaaga si toos ah loogu shubo

xisaabtaada bangiga, Lambarka Bulshada waa in ay kaa hayaan cinwaan sax ah aan warqadaha iyo macluumaadka muhimka ah kuugu soo diri karno. Macaashkaaga waa la joojinayaa haddii aynaan kula soo xiriir karin. Waxa aad cinwaankaaga ka bedeli kartaa bogeenna internateka adiga oo furaya ***my*** **Social Security**. Ama waxa aad naga soow ici kartaa **1-800-772-1213** ama aad isticmaali kartnaa nidamka codka lagu duubo.

Haddii qof qoyska ka tirsan oo qaata ay kula guurayaan, fadlan noo soo sheeg magacyadooda. Waa in aad hubisaa in aad la socodsiiso xafiiska boostada.

Haddii aad bedesho xisaabta toosla loogu shubo macaashka

Haddii uu isbedelo bankiga aad xisaabta ku leedahay ama aad furato xisaab cusub , barta internetka ayaad ka bedeli kartaa macluumaadka bankiga adiga oo galaya ***my*** **Social Security**. Ama telefoonka ayaan kuugu bedeli karnaa macluumaadka xisaabta ka dib marka aan xaqiijino aqoonsigaaga. Soo diyaarso lambarkaagii xisaaabta ee hore iyo kan cusub marka aad na soo waceyso. Waaxa aad ka helei kartaa jeeggaga bangiga ama warbixinta xisaabta ee bankiga lagaaga soo diro. Waxa ay qaadaneysaa 30-60 macluumaad si macluumaadkaaga loo bedelo. Ha xirin xisaabta bankiga ilaa aad ka xaqiijiso in macaashkaaga bankiga loo wareejiyey xisaabta bangiga ee cusub.

Haddii aanu qofku maareyn karin dhaqaalahiisa

Dadka qaarkood awood uma laha in ay maareeyaan lacagtooda. Haddii ay atasi dhacdo, waa in uu qof uun soo wrgeliyaa. Waxaa macashka loogu diri karaa qaraabada, qof kale, ama hay'ad xanaaneysa oo macaashka qofka sida dantisu ku jirto ugu maamuleysa. Qoflkaas ama hay'addaad waxa aan magacownaa "wakiilka macaash qaataha" Macluumaad dheeraad ah, ka akhri *A Guide For Representative Payees* (Publication No. 05-10076).

FIIRO GAAR AH: *Dadka "sharci ahaan mas'uulka laga yahay" ama "wakiilasho sharci ah" si toos ah uma noqonayaan wakiilka lacag qaatahay.*

Haddii aad qaadato macaash ka duwan macaashla shaqada

Haddii macaash laga siiyo shaqo aad horey uga shaqeysay oo aadan bixin jirin canshuurta Lambarka Bulshada—tusaale ahaan, adeegga hawlgabka dadka madniga ah ee dawladda dhexe ama nidaamka hawlgabka ee gobolada ama dawladaha hoose qaarkood—waxaa laga yabaa in loo baahdo in dib loo xisaabo macashka Lambarkaaga Bulshada. Sidoo kale nala soo socodsii haddii macaashka shaqada ka qaadatao uu isbedelo.

Haddii aad guursato ama aad kala tagtaan

Haddii aad guursato ama aad kala tagtaan, waxa ay taasi saameyn ku yeelaneysaa macaashka, taasoo ku xiran nooca macaashka ee aad heleysaan.

Haddii la joojiyo macaashkaaga adiga oo guursaday darteed ama dib u guursaday, waa in ay dib u bilaabaan marka guurku dhamaado. Shaxda hoose ayaa si fiican u faahfaahineysa.

Haddii lagu siiyo	Ka dibna:
Macaashka Hawlgabka ee shaqada aad qabatay	Macaashkaaga wuu sii soconayaa
Macaashka xaaska/qoyska	Macaashkaaga waa sii soconaa haddii aad kala tagtaan da'daaduna tahay 62 ama aad ka weyn tahay ilaa aad is qabteen wax ka yar toban sano
Macaashka ninka ama naagta laga geeriyooday	Macaashkaaga wuu sii soconayaa haddii aad dib u guursato marka ay da'daada tahay 60 ama ka weyn
Macaashkaaga wuu sii soconayaa haddii aad dib u guursato marka ay da'daada tahay 60 ama ka weyn	Guud ahaan, macaashka waa istaagayaa marka ad guursato. Macaashkaaga dib ayuu u bilaabanayaa mar kale haddii guurkiinu dhamaado

Haddii bedesho magacaaga

Haddii aad magacaaga bedesho—aad guursato, ama amar maxkamadeed aad ku bedesho—waxa aan u baahanahay in aad markiiba noo sheegto. Haddii aadan na soo gaarsiin

macluumaadkaas, macaashkaaga waxaa laguugu diraayaa magacii hore, haddii macaashka si toos ah laguugu shubayey xisaabta bankiga, waxaa suurtogal ah in lacagtu aanay ku dhicin xisaabtaada.

Haddii aad macaashka ku qaadato adiga oo korinaya ilmo yar

Haddii aad qaadato macaash oo aad ku qaadato ilmo da'diisu ka yar tahay 16 oo aad korineyso ama naafo ah, waa in markiiba na soo wargelisaa haddii aadan ilmaha korineyn ama aad bedesho cinwaanka. Waxaad na soo siisaa magaca iyo cinwaanka qofka ilmuhu la nool yahay.

Qoyska oo si ku meel u kala nool saameyn kuma yeelaneyso macaashka haddii ilmuhu adiga kula nool yihiin, laakiin macaashkaagu wuu istaagayaa haddii aadan ilmaha gacanta ku heyn. Haddii ilmuhu gacantaada ku soo nqodo, waxaa mar kale kuu bilaabanaya macaashka.

Macaashka lagu siiyo wuu soo dhamaanayaa marka ilmaha ugu yar ee aan guursan ee aad korineyso da'diisu gaarto 16 haddii aanu naafo aheyn. Ilmaha macaashkiisu wuu u sii soconayaa sida lagu qeexay bogga page 19.

Haddii qofku korianyo ilmo la siiyo macaash

Marka aad sharci ahaan korineyso ilmo macaash la siiyo, nala soo socodsii magac cusub ee ilmaha, xilliga ay maxkamaddu gaartay go'aanka mas'uul ka noqoshada, iyo magaca iyo cinwaanka waalidka korinaya. Korintu ma keeneyso inmcaashku istaago.

Haddii aad noqoto waalid ka marka laguu bilaabo in lagu siiyo macaash

Haddii aad noqoto waalid caruur dhalay (oo ay ka mid yihiin ilmaha aad korsaneyso) oo aad bilowdo in aad macaash qaadato, nala soo socodsii ilmaha, si aan go'aan uga gaarno in ilmuhu macaashka xaq u yeelanayo.

Haddii maxkamad amarto in lagu soo xiro

Waajib bey kugu tahay in aad sheegto haddii maxkamad amarto in lagu xiro oo dambiyada culus ee oo socda mid ka mid ah aad gashay:

- Duulimaad si aad uga maxkamadeyn iyo heyn;
- In aad ka baxsatay xabsi; iyo
- Khatar u tahay in aad baxsato.

Ma qaadan kartid macaashka naafada, dhaxalka, ama naafada ama lacag hore oo kuu baaqatay bilihii hore ee laguu soo jaray xariga ee lagugu soo eedeeyey dambiga culus.

Haddii lagugu helay fal dambiyeed

Haddii lagugu helo dambi adiga oo qaadanaya macaash Lambarka Bulshada, waa in aad markiiba na soo wargelisaa. Inta badan qofka lama siiyo macaash bilaha uu xiran yahay, laakiin xubnaha qoyska ee xaqa u leh macaashka waa la siinayaa.

Haddii lagugu helay fal dambiyeed oo xabsi lagu dhigay

Macaashka inta badan lama siiyo qof geystay fal dambiyeed oo lagu xiray xabsi oo sidaas ay maxkamad amartay dawladduna kharashka bixiseyso. Taas waxaa la mid ah haddii qofka lagu helay:

- Dambi, laakiin aanu miyirkiisu dhameyn; ama
- Dambiga lagu waayey iyada oo loo tixgeliyey inuu qabo cudurada dhimirka ama waxyaabo la mid ah (sida cudurada dhimirka, ku dhashay maskaxdiisa oo aan dhameyn ama aanay maskaxdiisu dhameyn); ama
- Aan miyirkiisu dhameyn inuu ka qeyb qaato dhageysiga maxkamadda
- Khatar ku ah dadweynaha oo galmoodka ku maman (aad u jecel).

Haddii aad jabiso shuruudaha xabsiga lagaaga sii daayey ama kor kala socoshada

Waxaa waajib kugu ah in aad noo sheegto haddii aad jabisay shuruudaha kala socoshada ama xabsi ka sii deynta sida ay dhigayaan sharciyada adwladda dhexe iyo gobol. Laguma siinayo

macaashka bil kasta oo ka mid ah kaa baaqtay ama lacagaha kuu baaqday ee aan weli lagu siin bil kasta oo aad jabisay shuruudaha kor kala socoshada iyo xabsi ka siideynta.

Haddii aad dibadda uga baxdo Mareykanka

Haddii aad heysato dhalashada Mareykanka, waad u safri kartaa oo ku noolaan kartaa wadamada dibadda iyada oo aanay wax saameyn ah ku yeelan macaashka Lambarka Bulshada. Hase yeeshee, waxaa jira wadamo aynaan kuugu soo diri karin macaashka Lambarka Bulshada. Wadamaaad waxaa ka mid ag Azerbaijan, Belarus, Cuba, Georgia, Kazakhstan, Kyrgyzstan, Moldova, North Korea, Tajikistan, Turkmenistan, Ukraine, Uzbekistan iyo Vietnam. Hase yeeshee, waxaa laga yaabaa in xaalado gaar ah loo tixgelin karo dadka qaata macaashka ee ku nool wadamada aan aheyn Kuuba iyo Kuuriyada Waqooyi. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladahaas gaarka ah, la xiriir xafiiska degaanka ee Lambarka Bulshada.

Nala soo socodsii haddii aad qorsheyneyso in aad dibadda uga baxdo Mareykanka 30 maalmood ama ka badan. Noo sheeg wadanka ama wadamada aad qorsheyneyso in aad soo booqato iyo taariikhda aad qorsheyneyso in aad waddanka Mareykanka ka baxdo. Waxaa kuu soo direytnaa macluumaad gaar ah oo aan kuugu sheegeyno sida aad ka yeeleyso macaashkaaga inta aad maqan tahay. Hubi in aad na soo wargeliso goorta aad ku soo noqneyso Mareykanka.

Haddii aadan heysan dhalashada Mareykanka oo aad ku soo noqoneyso Mareykanka si aad ugu noolaato, waa in aad noo soo gudbisaa caddeyn muujineysa in aadan heysan dhaalshada si uu kuugu sii socdo macaashka. Haddii aad ka shaqeyso meel ka baxsan Mareykanka, sharciyo gaar ah ayaa loo adeegsadaa in aad qaadan karto macaashka.

Macluumaad dheeraad ka akhri *Your Payments While You Are Outside The United States* (Publication No. 05-10137).

Haddii uu isbedelo sharciga aad waddanka ku joogto

Haddii aadan heysan dhalashada, na soo wargeli marka aad qaadato dhalashada ama sharcigaaga wax iska bedelaan. Haddii sharciga aad waddanka ku joogto dhaco, waa noo gudbisaa ceddeyn muujineysa in aad si sharci ah waddabnka ku sii joogi akrto.

Haddii qofka macaashka qaadanayey geeriyoodo

Na soo wargeli haddii qof qaadanayey macaashka geeriyoodo. Macaash lama siinayo bisha uu qofku geeriyoodo. Taas micnaheedu waxaa weeye, tusaale ahaan, haddii qofku geeriyoodo Luulyo jeegga agoosto Agoosto (oo ah lacagtii Luulyo) waa in la soo celiyaa. Haddii lacagta toos loogu shubay xisaabta bangiga waa in la wargeliyaa bangiga geerida sida ugu dhaqsaha badan si uu u soo celiyo lacgata la bixiyey dhimashada ka dib.

Xubanaha qoyska waxaa laga yaabaa in ay xaq u yeeshaan macaashka dhaxalka marka qofka geeriyooday la siinayey macaash.

Haddii lagu siiyo macaashka Lambarka Bulshada iyo hawlgabka shaqaalaha tareenada

Haddii aad qaadaneyso macaashka lambarka bulshada iyo hawlgabka shaqaalaha tareeenada labadaba oo ku saleysan shaqada xaaska/seyga oo xaaskaaga/seygaaga geeriyoodo, waa in aad markiiba na soo wargelisaa. Xaq uma lihid in laguu sii wado laba macaash. Waxa lagu wargelin doonaa macaashka dhaxalka ee aad xaqa u leedahay.

Adiga oo shaqeynaya hadana qaadanaya macaash

Sidee Ayaa dakhliga saameyn ugu yeeleneysaa macaashka

Waad shaqeyn karta oo qaadan kartaa macaashka hawlgabka. Dakhliga ku soo gala (ama ka dib) bisha aad gaarto hawlgab buuxa ma yareeynayo macaashka kaa soo gala Lambarka Bulshada. Hase yeeshee, macaashkaagu wuu yaraanayaa haddii dakhliga ku soo galo ka badato xadka u go'an bilaha ka horeeya inta aadan gaarin da'da

hawlgabka buuxa. (Da'da hawlgabka buuxa ee dadka leh dhaxalka waa 66 dadka dhashay 1943-1954 waxayna u kordheysaa si tartiib tartiib ah ilaa ay ka gaaraan 67 dadka dhashay 1960 ama ka dib.)

- Haddii aad shaqeyso laakiin aad bilowdo in aad qaadato macaash ka hor da'da hawlgabka buuxa $1 ee macaash ah waxaa loo goynayaa $2 kasta ee dakhliga shaqada kaa soo gala wixii ka sareeya lacagta u go'an sanadkii ($15,120 ee 2013).
- Sanadka aad gaarto hawlgabka buuxa, $1 ee macaash ah ayaa loo goynayaa $3 kasta ee dakhliga shaqada kaa soo galaya wixii ka sareeya lacagta xadka sanadkii ($40,080 ee 2013) ilaa bisha aad gaarto hawlgabka buuxa. Ka dib waxaa lagu siiyaa macaashka hawlgabka buuxa, iyada oo aan la eegin dakhliga ku soo gala.

Haddii aad ka yar tahay da'da hawlgabka buuxa oo qaar ka mid ah macaashka lagaa jaro taasoo ay ugu wacan tahay dakhligaaga oo ka badan $15,120, war wanaagsan baan kuu haynaa. Marka aad gaarto da'da hawlgabka buuxa, macaashkaaga wuu kordhayaa iyada oo xisaabta lagu darayo bilaha aadan macashka qaadan ama macashka la yareeyey.

Sidoo kale, mushaharka aad qaadato ka dib marka ad codsatay macaashka Lambarka Bulshada waxaa suurogal ah in dakhliga ku soo gala celcelis ahaan iyo macashkaaga ay kordhaan.

Macluumaad dheeraad ah, ka akhri *Sidee Ayaa Shaqadu Saameyn Ugu Yeeleneysaa Macaashka* (Publication No. 05-10069-SO).

Sharciyada gaarka ee bil kasta

Mararka qaarkood dadaka hawlgabka noqda bartamaha sanadka waxa ay qaateen wax ka badan dakhligii loo gooyey sanadka oo dhan. Taas weeye sababta ay u jiraan xeerar gaar ah oo loo adeegsado dakhliga sanadka, inta badan sanadka ugu horeeya ee hawlgabka. Sida uu dhigayo sharcigan, waxa aad qaadan kartaa jeega Lambarka Bulshada bisha uu dakhligaagu ka hooseeyo xadka loogu talo alay, iyada oo aan loo eegin dakhliga sanadka oo dhan.

Sanadka 2013ka, qof ka yar da'da hawlgalka buuxa (66 dadka dhashay 1943-1954) waxa loo tixgeliyaa hawlgab haddii dakhligiisa bishu ka yar yahay $1,260 ama ka yar. Tusaale ahaan, Joh Smith hadii uu ku noqdo hawlgab da'da 62 30ka Agoosto 2013. Dakhligisu waxa uu noqonayaa $45,000 ilaa Agoosto. Haddii uu helo shaqo

waqtiga dhiman oo uu bilaabo Nofeembar waxa uu dakhligiisu noqnayaa $500 bishii. Inkasta oo dakhliga soo galay uu si la taaban karo uga sara marayo xadka u go'an ee loo gol yahay ($15,120), waxa la siinayaa macaashka Lambarka Bulshada bilaha Siteembar ilaa Diseembar. Tani waxa ay ku dhacday isaga oo bilahaas uu dakhligiisu ka yar yahay $1,260, si gaar ah "sanadka ugu horeeya ee hawlgabka" xadka dakhliga ee u bil kasta u go'an dadka gaara da'da hawlagabka buuxa. Haddii dakhliga soo gala Mr. Smith uu ka bato $1,260 mid ka mid ah bilahaas (Siteembar ilaa Diseembar), ma helayo macaash bilahaas.

Laga bilaabo sanadka 2014, xadka u go'an dakhliga ayaa loo adeegsanayaa waayo waxa uu dhafay sanadkii ugu horeeyey ee hawlgabka waxaana uu maray xeereka gaarka ee bisha intii lagu jiray sanadka.

Haddii aad iskaa u shaqeysato, xadka bil kasta waa mid ku saleysan hadii hawl la taaban karo ka qabato ganacsigaaga. Guud ahaan, haddii aad ganacsiga ka shaqeyso wax ka badan 45 saacadood bishii, bishaas macaash laguma siinayo.

Haddii aad mushahar ku sahqeyneysay

Muashaharka waxaa lagu xisaabaa dakhli ku soo gala marka aad shaqeyso ee ma aha goorta lacag lagu siiyey. Haddii uu jiro dakhli aad shaqeysay sanadkii hore, laakiin lacagtiisa lagu siiyey sanadka xiga, waa in loo xisaabaa sida dakhli sanadkii hore ku soo galay. Qaar ka mid ah dakhliga dib loo dhigayw axaa ka mid ah fasaxa caafimaadka iyo kan caadiga ah ee kuu ururay, gunada, shahaadooyinka ganacsiga iyo lacagaha kale ee dib loo dhigo. Haddii lagu siiyo mushaharka shaqo aad sanad hore qabatay, waa in aad nala soo xiriirtaa.

Waxaanu heshiis kula jirnaa Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS) in shaqaaluhgu ku sheegaan lacag bixin dib loo dhigay oo lagu xuso foomka W-2. Lacagtaas waxaa lagu qoraa sanduuqa ay ku qoran tahay "dakhliga aan la xisaabeyn." Waxaanu ka jareynaa tirada sanduuqa lagu qoray dakhliga guud ee ku soo gala si aan u ogaano dakhliga snadka ku soo gala.

Haddii aad iskaa u shaqeysato

Haddii aad iskaa u shaqeysato, dakhliga waxaa la xisaabayaa marka uu ku soo galo — marka laga reebo haddii lacagta lagu siiyosanad ka dib marka aad xaqa u yeelatay Lambarka Bulshada oo aad lacagta shaqeysay ka hor intii aadan xaqa u yeelan. Tusaale ahaan, haddii aad bilowdo in aad qaadato macaashka Lambarka Bulshada bisha Juun 2012 oo lacagi ku soo gasho Febraayo 2013 taasoo aad shaqeysay bishii Juun ee 2012 taas laguma xsiaabayo dakhliga ku soo gala 2013. Hase yeeshee, haddii lacagta ku soo gashay Febraayo 2013 ay tahay shaqo aad qabatay wixii ka dambeeyey bishii Juun 2012 waxaa lagu xisaabayaa xadka dakhliga ku soo gala 2013.

Soo sheegista dakhligaaga

Iyada oo laga yaabo in dakhligaagu saameyn ku yeesho macaashka Lambarkaaga Bulshada, waxaanu dooneynaa in aan ogaano dakhliga ku soo gala sanadka. Inta badan, waxa aan macluumaadkaas ka helnaa:

- Dakhliga ay goobta shaqadu ku sheegaan foomka W-2; iyo
- Dakhliga shaqada aad iskaa u qabato ee aad ku qorto canshuiur celinta sanadka.
- Dakhliga lagaa doonayo in aad noo soo sheegto marka uu sanadka dhamaado haddii:
  - — Waxa aad xaq u leedahay sharciga gaarka ah ee bil kasta (arag bogga 15) oo dakhliga ku soo galana wuu ka yar yahay xadka bil kasta (haddii ay sidaas tahay, na soo wargeli si aan kuu siino macaashka bishaas);
  - — Qeyb amd dhamaan dakhliga ku xusan foomkaaga W-2 ee aan ku soo gelin sanadkii aad shaqeysay.
  - — Mushaharkaaga oo ka sareeya xadka ganacssigana uu khasaare galay.
  - — Foomka W-2 waxaa ku qoran mushahar ay goobta shaqadu sheegtay oo hadana aad ku sheegtay canshuurta ganacsiga gaarka ah (wadaadada diinta, tusaale ahaan);
  - — Canshuurta ayaad xareysay, laakiin wax badan kama aadan qaban ganacsiga ama canshuurta waxa aad ku xareysaa mid sanadle ah.

— Waxa aad tahay beeraley waxaadna qaadata macaashka barnaamijyada dawladda dhexe ee beeralayda ama dakhli ayaa ka soo gala mirihii sndkii hore; ama

— Macaashka qaarkood ayaan kaa jarnaa, laakiin ma lihid dakhli sanadka ama dakhligaaga ayaa ka yaraa inta aad noo sheegtay.

Haddii aan wax ka bedaleyno macaashka aad qaadato, taasoo ku saleysan warbixinta aad noo sheegtay, waanu kuu sheegeynaa. Waxaa muhim ah in aad macluumaadka dib ugu noqoto. Qiyaastii bartamaha sanadka, waxaa laga yaabaa in aan kuu soo dirno waraaq aan kugu weydiisaneyno in aad noo sheegto qiyaasta dakhliga sanadkan iyo sanadka soo socda. Qiyaastaadu waxa ay naga caawineysaa in aan ka digtoonaano in aanmacaash fara badan ku siino ama macaash yar ku siino.

FIIRO GAAR AH: *Haddii lagu siiyo Macaashka kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI) iyo macaashka Lambarkaaga Bulshada, waa in aad Lambarkaaga Bulshada u soo sheegtaa dakhliga ku soo gala.*

Qiyaasta dakhligaaga iyo macaashka

Waxaanu wax ka bedelnaa macaashka sanadka taasoo ku saleysan dakhliga aad noo sheegtay in laga yaabo inuu ku soo galo sanadkan.

Haddii xubnaha kale ee qoyska la siiyo macaash ku saleysan shaqada, dakhliga saameyn ayuu ku yeelanayaa guud ahaan macaashka reerka. Laakiin, macaashka aad u qaadato adiga oo ah xubin ka tirsan qoyska, dakhligaagu waxa uu saameyn ku yeelanayaa macaashkaaga oo kaliya.

Dib ugu noqoshada qiyaasta

Marka aad shaqeyneyso, waa in meel dhigtaa qeybat dambe ee jeegga. Inta sanadka lagu jiro, haddii aad aragto in dakhligaagu ka duwananayo qiyaastii aad sameysay, waad nala soo xiriir kartaa si aad dib ugu noqoto qiyaasta. Taas waxa ay naga caawineysaa in macaashka aan ku siino ee Lambarkaaga Bulshada uu noqdo mid sax ah.

Macaashka la siiyo Haweenka iyo ragga laga geeriyoodo

Waxa aad u bedelan kartaa macaash ku saleysan shaqada aad adigu shaqeyso haddii uu ka badan yahay kan aad ku qaadaneyso xaaskaaga/seygaaga geeriyooday. Macaashkaasi wuu ka badnaanayaa marka da'du gaarto 62 ama ugu dambeynta da'da 70. Sharciyadu waa kuwo isku dhafan oo mar walba ku xiran xaaladda. Haddii aadan kala hadlin wakiil ka tirsan Lambarka Bulshada arrimaha macaashka hawlgabka (ama xaaladaada is bedeshay), la xiriir Xafiiska Lambarka Bulshadasi aad uga hadashaan fursadaha aad leedahay.

Macaashka Ilmaha

Haddii ilmaha la siiyo macaash ku saleysan shaqada, waxaa jira waxyaabo muhim ah oo la doonayo in aad ka ogaato macaashka.

- **Marka ilmuhu gaaro 18**
  - —Macaashka ilmaha waa laga joojiyaa bisha ka horeysa marka uu gaaro 19 haddii aanu ilmuhu naafo aheyn ama uusan arday waqtiga buuxa aheyn oo dhigta dugsi dhexe ama sare.
  - —Shan bilood ka hor inta aanay da'da ilmuhu gaarin 18, qofka qaadanaya macaashka ilmaha waxaa loo soo dirayaa warqad laguugu sharxayo sida uu macaashku ku sii socon karo.
  - —Ilmaha macashka laga joojiyo marka uu gaaro 18 marka kale ayey soo bilaabi karaan haddii uu noqdo naafo ka hor inta aanay da'diisu gaarin 22 sano ama arday waqtiga buuxa aheyn oo dhigta dugsi dhexe ama sare ka hor inta aanu gaarin 19 sano.
- **Haddii ilmuhu naafo yahay**
  - —Ilmuhu macaashka waa u sii socon karaa marka uu gaaro 18 haddii uu naafo yahay. Waxaa kale oo suurtogal ah in ilmuhu xaq u yeesho macaashka SSI ee naafanimada. Nala soo xiriir haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah.
- **Haddii ilmuhu gaaro 18 uuna yahay arday**
  - —Ilmuhu waa la siinayaa macaashka ilaa uu gaaro19 haddii uu yahay arday waqtiga buuxa oo dhigta dugsi dhexe ama sare.

Marka ilmuhu gaaro 19 ay ku beegan tahay xilli iskuulku furan yahay, macaashku wuu u sii soconayaa ilaa uu ka dhameeyo xilliga, ama labada bilood ee ku xiga ee uu gaarayo 19 jir, hadba kan soo horeeya.

—Waa in la soo wargeliyaa durbadiiba haddii ilmuhu ka tago dugsiga, ama waqtiga buuxa isu bedelo oo noqdo waqtiga dhiman, laga eryo ama laga jooyiyo ama uu bedesho dugsiga. waa in sida oo kale nala soo wargeliyaa haddii ardeyga lacag lagu siiyo tegitaanka dugsiga.

—Arday kasta waxaan u soo dirnaa bilowga iyo dhamaadka sanad dugsiyeedka. Waa muhim in foomka la buuxiyo oo naloo soo celiyo. Waxaa suurtogal ah in aan joojino macashka haddii aynaan helin foomka.

—Ardayda waxaa suurogal in la siin karo macaashka xiliyada fasaxa ee afar bilood ama ka yar ah haddii ay qorsheynayaan in ay dib ugu noqdaan dugsiga xilli buuxa marka uu fasaxu dhamaado.

—Ardayga joojiya inuu tago dugsiga weli waa la siinayaa macaashka marka uu dib ugu noqdo dugsiga ka hor inta aanu gaarin 19. Ardaygu waa inuu nala soo xiriiraa si uu dib ugu codsado macaashka.

- **Sidee ayaa furiinku saameyn ugu yeeshaa ilmaha uu xaadkaaga/seygaag dhalay.**

—Haddii macaashka ilmaha uu xaaskaaga/seygaaga dhalay ay ku saleysan tahay shaqada oo adiga iyo waalidka ilmaha aad kala tagteen, macaashka ilmaha wuu istaagayaa bisha xigta marka uu dhamaado furiinka. Waa in sida ugu dhaqsaha badan naloo soo wargeliyaa furiinka marka la soo gabagabeeyo.

Barnaamijka Gargaarka ee Nafaqeynta (Gargaarka Cuntada)

Waxaa suurogal ah in aad caawinad ka heli karto Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada (SNAP), oo horey loogu yiqiin gargaarka cuntada. Soo booqo ***www.fns.usda.gov/snap*** si aad u ogaato habka loo codsado. Macluumaad dheeraad waxa aad ka

heli kartaa *Nutrition Assistance Programs* (Publication No. 05-10100) ama *Macluumaad Ku Saabsan Barnaamijka Gargaarka ee Nafaqeynta* (Publication No. 05-10101-SO).

Ma lagu siinayaa SSI?

Haddii dakhligaaga ama hantidaadu kooban tahay, waxaa laga yaabaa in SSI ku caawin karto. SSI waa barnaamij ay dawladda dhexe maamusho. Waxaa laga bixiyaa dakhliga guud ee canshuurta, lagama bixiyo canshuurta Lambarka Bulshada.

SSI waxa ay bil kasta lacag siisaa dadka 65 sano jirka ah ama ka weyn ama indha la'a ama naafada ah. Haddii lagu siiyo SSI, waxa suurogal ah in aad xaq u leedahay macashka kale, sida Medicaid, SNAP iyo adeegyada kale.

Ma xisaabno qaar ka mid ah dakhliga ama qaar ka mid ah hantidaada marka aan go'aanka ka gaareyeno in aad xaq u leedahay SSI. Gurigaaga iyo garigaaga, tusaale ahaan, inta badan looma xisaabo kheyraad ahaan. Nala soo xiriir si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama aad u codsato SSI.

Haddii aad nagu diidan tahay go'aanka aan gaarno

Haddii aad wax su'aal ah ka qabto macashka lagu siiyo ama macluumaad aan kuu soo dirnay, la xiriir.

Haddii aad nagu diidan tahay go'aanka aan gaarno, xaq waxa aad u leedahay in aad na weydiisato in aan dib u tixgelino. Codigaagu waa inuu qoraal noqdaa lagana diiwaan geliyaa Xafiiska Lambarka Bulshada 60 maalmood gudahood laga bilbaabo maalinta aad hesho.

Haddii aadan ku qancin, waxaa jira talaabooyin dheeraad ah oo aad qaadi karto. Akhri *Xaqa Aad U Leedahay In Aad Su'aalo Ka Weydiin Karto Codsigaaga* (Publication No. 05-10058-SO).

Xaq waxa aad u leedahay in lagu matalo

Waad diyaarinracfaankaaga inaga oo lacag la'aan kugu caawineyna ama waxa aad sameysan kartaa wakiil ku caawiya. Waxaanu ku siineynaa macluuamadka hay'adaha aad ka heli karto caawinaad si ayw akiil kaaga noqdaaan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakiilka, akhri *Xaqa Aad U Leedahay Wakiil* (Publication No. 05-10075-SO).

Ilaalinta macluumaadkaaga shaqsiga ah

Waa in aad kaarkaaga Lambarka Bulshada ku xafiddaa meel amaan ah oo aad waqradaha kale oo muhimka ah aad dhigto. Ha ku qaadin jeebka haddii aadan u baahneyn in aad tusto goobta shaqada ama adeeg bixiyayaasha.

Lambarka Bulshada waxa ay macluumaadkaaga ka dhigaan mid qarsoodi ah— magacyada, Lambarka Bulshada, dakhliga ku soo gala, da'daada, iyo cinwaanada dadka la siiyo macashka — oo malaayiin fara badan. Guud ahaan, adiga kaliya ayaan kaal hadleynaa macluumaadkaaga. Marka aad na soo booqato ama na soow acdo, waxa aan ku weydiineynaa dhawr su'aalood oo naga caawin kara in aan ku xaqiijino. Haddii uu qof kale kaa caawinayo Lambarkaaga Bulshada, waxa aan u baahanahay in aad noo fasaxdo in aan macluumaadkaaga kaga hadalno qofkaas.

Waxa aan kaaga digeynaa in aad ka taxadarto Lambarkaaga Bulshada oo aad ilaaliso intii suurogal ah.

Way naga go'an tahay in aan qarsoodi ka dhigno macluumaadkaaga. Marka ay sharci ahaan waajib nagu tahay in aan macluumaadkaaga la wadaagno hay'adaha kale ee ceydha ama caafimaadka, sida Medicaid and SNAP, hay'adahaas looma ogola in ay macluumaadkaaga cid kale la wadaagaan.

Fariin ku saabsan Medicare

Medicare waa ceymiska caafimaadka ee dadka da'doodu tahay 65 ama ka weyn tahay. Dadka naafada ah, kelyahoodu aanay shaqeyneyn ama qaba cudurka murqaha (Lou Gehrig's disease) waxaa la siinayaa Medicare da'd kasta oo ay jiraan.

Medicare waxa ay leedahay afar qeybood

- Ceymoska isbitaalka (Qeybta A) waxa uu caawiyaa bukaanka ku jira isbitaalka iyo adeegga xiga qaarkiis,
- Ceymiska cafimaadka (Qeybta B) waxa ay bixisaa adeegga dhakhtarka, bukaanka soo booqda isbitaalka ama adeegga kale ee caafimaadka.
- Medicare Advantage plans (Qeybta C) waxa soo jirtay sanado badan. Dadka heysta caafimaadka Qeybta A and B waxa ay u dooran karaan in ay isaga bixiyaan dhamaan adeegooda

caafimaadka iyada oo u sii maraya hay'ad adeegga u qabata sida ku cad Qeybta C.

- Bixinta kharashka daawada (Qeybta D) waxa ay bixisaa daawada dhakhtarka ee loogu qoro daaweynta bukaanka.

Yaa xaq u leh ceymiska isbitaalka (Qeybta A)?

Dadka intooda badan waxaa la siiyaa ceymiska isbitaalka marka ay da'doodu gaarto 65. Si toos ah ayaad xaq ugu yeelaneysaa haddii aad xaq u leedahay macaashka Lambarka Bulshada ama hawlgabka tareenada. Ama waxaa suurtogal ah in xaaskaaga/seygaaga xaq u yeelan karo (oo ay ka mid yihiin xaaska/seyga aad kala tagteen) macaash ku saleysan shaqada. Waxaa suurogal ah in dadka kale xaq u yeelan karaan waayo dawladda ayey u shaqeeyaan mana hoos yimaadaan Lambarka Bulshada ee laga bixiyo canshuurta Medicare.

Haddii aad qaadato macaashka naafada ee Lambarka Bulshadamuddo 24 bilood ah, waxa aad xaq u yeelaneysaa ceymiska isbitaalka.

Haddii aad qaadaneyso Ceymiska Lambarka Bulshada waa waxa aad qabtaa cudurka murqo jajabka (amyotrophic lateral sclerosis) (cudurka Lou Gehrig's), waajib kuguma aha in aad sugto 24ka bilood.

Sidoo kale, dadka aan kelyahoodu shaqeyneyn ee sida joogtada ugu baahan sifeynta dhiigga ama in kelyaha laga bedelo waxa ay xaq u leeyihiin ceymiska isbitaalka haddii ay shaqeeyeen in ku filan ama ay yihiin xaaska/sayga ama ilmo uu dhalay qof shaqeeyey muddo ku filan.

Yaa loo ogol yahay ceymiska caafimaadka (Qeybat B)?

Qof kasta oo xaq u leh ceymiska isbitaalka wuu codsan karaa ceymiska caafimaadka. Qeybta B waa barnaamij doorashada qofka ku xiran. Ma aha lacag la'aan. Sanadka 2013, lacagta bil kasta qofku bixiyo waa $104.90. Dadka qaarkiis oo dakhligoodu sareeyo waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan lacag fara badan.

Yaa loo gol yahay Medicare Advantage Plans (Qeybta C)?

Qof kasta oo heysta ceymiska cisbitaalka ee Medicare (Qeybta A) iyo Ceymiska caafimaadka ee (Qeybta B) waa ku biiri karaa Medicare Advantage plan. Ceymiska Medicare Advantage waxaa ka mid ah:

- Qorshaha caafimaadka ee Medicare maamusho;
- Qorshaha caafimaadka ee ay maamulaan hay'adaha qaata Medicare (PPO);
- Qorshaha gaarka ah ee lacata la bixiyo ee Medicare; iyo
- Qorshaha Takhasuska ee Medicare.

Waxaa laga yaabaa in aad bixiso lacag bil kasta ah waayo macaashka dheeraadka ah ee uu leeyahay Medicare Advantage plan.

Yaa loo ogol yahay Bixinta daawada ee Medicare (Qetba D)?

Qof kasta oo hesya ceymiska isbitaalka ee Medicare (Qeybta A) ama ceymiska caafimaadka (Qeybta B) ama Medicare ADvantage Plan (Qeybta C) waxa uu xaq u leeyahay ceymiska bixiyo daawada loo qoro (Qeybta D) Daawada oo lagaa bixiyo waa mid aad dooran akrto, waxaadna bixineysaa lacag dheeraad ah oo bil kasta ah. Dadka qaarkiis oo dakhligoodu sareeyo waxaa laga yaabaa in ay bixiyaan lacag fara badan.

Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heli kartaa *Medicare* (Publication No. 05-10043).

Bixinta kharashka ee Medicare ay ku caawiso dadka dakhligoodu hooseeyo

Haddaii dakhligaagu hooseeyo hantidaaduna yar tahay, gobolka aad degan tahay ayaa laga yaabaa inuu bixiyo lacagta ceymiska, xaaladaha qaarkood, sida kharashka caafimmadka "kan aad jeebkaaga" ka bixiso, lacagta kugu beegantay iyo qeybta ceymiska ee aad iska bixisay.

Gobolkaaga oo kaliya ayaa go'aan ka gaari kara in aad xaq u leedahay in barnaamijkan ku caawiyo. Haddii ad is leedahay xaq baad u leedahay, la xiriir gobolka iyo gargaarka caafimaaka ee degaanka (Medicaid), xafiiska adeegga dadweynaha.

"Caawinaad dheeraad" oo lagaa caawiyo daawada dhakhtarku qoro ee Medicare

Haddii dakhligaagu iyo hantidaadu kooban tahay, waxa suurtogal ah in aad xaq u yeelato in lagaa bixiyo daawada sida uu dhigayo Medicare Part D. Doorka Lambarka Bulshada waa in aad fahamto sida aad xaq ugu yeelaneyso oo codsigaagana kaa qabto ee caawinada dheeraadka ah. Si aad u ogaato in aad xaq u leedahay ama aad u codsato, la soo xiriir lambarka lacag la'aanta ah ee bulshada ama soo booqo barta internetka.

www.socialsecurity.gov

Social Security Administration
SSA Publication No. 05-10077-SO
What You Need To Know When You Get
Retirement Or Survivors Benefits (Somali)
March 2013